

1/23/2023

<<First Name>> <<MI>> <<Last Name>>
<<Mailing Address 1>> <<Mailing Address 2>>
<<City>>, <<State>> <<ZIP>>

Lacagaha gargaarka ee SNAP waxay hoos uu dhici doonaan Maarso 2023 iyada oo sababtu tahay gargaarka cuntada degdega ah ee COVID-19 oo joogsanaya

Waxaad helayaa gargaarka cuntada degdega ah ee COVID-19 bil kasta. Waxaad heshaa lacagtani dheeraadka ah oo ku jirta kaarkaaga (Cayrta ee Oregon) ee EBT qiyaastii maalinta 11-aad ama 12-aad ee bisha.

Febraayo 2023 waa bisha u dambeysa ee aad heli doonto gargaarka cuntada degdega ah ee COVID-19.

Waxaad sii wadan doontaa gargaaradaada SNAP ee caadiga ahaa. Waxaad gargaaradani ku heshaa kaarkaaga EBT inta u dhaxaysa maalinta 1-aad iyo 9aad ee bisha.

Tani iyo 2020, boqolaal kun oo ah guryaha SNAP ayaa helay gargaarka cuntada degdega ah ee COVID-19. Dib ugu laabashada lacagta caadiga ee SNAP waxay noqon doontaa mid adag oo walwal badan u leh kuwo badan.

Uma baahnid in aad qaado tallaabo, laakiin waad diyaar garoobi kartaa:

- **Ogow lacagtaada gargaarka ee SNAP ee caadiga ah:**
 - Waxaad gashaa barta koontadaada ONE ee <https://one.oregon.gov/> ama
 - Taariikhdaada wax iibsiga 'transaction' ka fiiri www.ebtEDGE.com
- Haddii aad garanayso lacagtaada gargaarka ee SNAP ee caadiga ah wuxuu kaa caawin karaa in aad miisaaniyad dejisato.

- **Noo sheeg haddii uu dakhligaagu hoos u dhacay.** Haddii uu sidaasi noqday, waxaa dhici karto in aad u qalanto gargaarada SNAP oo dheeraad ah.
- **Noo sheeg haddii ay jiraa dad dheeraad ah oo ka tirsan gurigaaga.** Haddii ay jiraan, waxaa dhici karto in aad u qalanto gargaarada SNAP oo dheeraad ah.

Si aad u soo sheegto isbeddelada ku yimaada dakhliga ama dadka ka tirsan gurigaaga:

- Cusbooneysii koontadaada dhanka internet-ka ee ONE
<https://one.oregon.gov/>
 - Xarunta Adeega Macmiilka ee ONE ka wac: 1-800-699-9075
 - Booqo xafiiska degaanka:
 - Hel Xafiiska Dadka Da'da iyo Kuwa Naafada ah:
<https://www.oregon.gov/dhs/offices/pages/seniors-disabilities.aspx>
 - Hel Xafiiska Isku-Filnaanshaha:
<https://www.oregon.gov/dhs/Offices/Pages/Self-Sufficiency.aspx>
 - Boosta: ONE Customer Service Center, PO Box 14015, Salem, OR 97309
 - Fax-ka: 503-378-5628
- **Ogow taageerada cuntada ee ka jirta degaankaaga.** Si aad u hesho kuwo kuu dhow:
 - Isku xirnaanshaha Ilaha Dadka Waaweyn iyo Naafada (ADRC) kala xiriir 1-855-673-2372
 - Wac 2-1-1
 - Booqo www.oregonfoodfinder.org or
 - Waxaad ku xirantaa Hay'adaada Waxqabadka Bulshada ee degaanka adiga oo adeegsanaya <https://caporegon.org/>.

Waa maxay sobobta ay tani u dhacaysaa?

Gargaarka cuntada degdega ah ee COVID-19 (oo sidoo kale loo yaqaan qoondeynta xaalada degdega ah) wuxuu ahaa **gargaarka cuntada ee ku meel gaarka** oo loogu talagalay dadka helaya SNAP. Gargaarkani wuxuu ka yimid dowladda federaalka iyada oo laga jawaabay COVID-19.

Bil kasta, Oregon waa in ay dowladda federaalka ka codsataa in ay noo oggolaato bixinta gargaarka cuntada degdega ah ee COVID-19. Dowladda federaalka ayaa go'aansatay in Oregon aysan sidaasi samayn karin wixii ka dambeeya Febraayo.

Waxaad heli kartaa warqadan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee Braille ama qaabka aad doorbidayso. Waxaad sidoo kale codsan kartaa turjubaan. Caawimaadani waa mid lacag la'aan ah. Wac 1-800-699-9075 ama TTY 711. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta.